Oregon Department of Human Services
OFFICE OF DEVELOPMENTAL DISABILITIES SERVICES

# **1915 (c) Ka-dhaafitaanka Baahiyaha Aan Caadiga Ahayn ee Carruurta 2024–29 codsiga:** Macluumaadka kooban ee faallooyinka dadweynaha iyo jawaabaha uu ka bixiyay Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka (ODDS, Office of Developmental Disabilities Services)

Xafiiska ODDS wuxuu soo uruuriyay faallooyin dadweyne markii la samaynayay qabyo-qoraalka 1915 (c) Ka-dhaafitaanka Baahiyaha Aan Caadiga Ahayn ee Carruurta laga bilaabo 5-ta Oktoobar–5-ta Diseembar, 2023. Waad ku mahadsan tihiin, dhammaantiin intii jawaabaha bixisay oo intii nala wadaagtay jawaab-celinta, fikradaha, iyo sheekooyinka ama halganka u gaarka ah. Jawaab-celintaadu waxay wax ku biirisay dib-u-eegista aan ku samynay codsiga.

Jadwal kasta oo hoos ku yaala, waxaanu ku uruurinay oo ku soo koobnay faallooyinka isku midka ah. Jawaab-celin ayaan ka bixinaa faallooyin kasta oo kooban. Waxaanu sharaxnaa inaan u isticmaalnay soo-jeedinta aad bixisay dib-u-eegista aan ku samaynay qabyo-qoraalka ka-dhaafitaanka. Annagoo u hoggaansamayno shuruudaha dawladda, waxaan xogtan ku darnay codsiga Ka-dhaafitaanka Baahiyaha Aan Caadiga Ahayn ee Carruurta.

| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Waalidiinta iyo qoysaska hela adeegyada ODDS, qareennada dadka hela adeegyada ODDS, Qareenada Taageera Dadka Naafada ah, Daryeeleyaasha Qoyska ee Mushaariga ah — Oregon, iyo Ururka Ootiisamka/Dhakaakaha ee Oregon |

| |
|---|
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay faallooyin badan oo la nooga codsanayo ku darista tixgelin la'aanta dakhliga waalidka. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Iyadoo lagu salaynayo faallooyinka aan helnay, waxaan 42 CFR §435.217 kooxaha u-qalma maaliyadda ku darnay codsiga dib loo eegay. Ku daristani waxay saamaxaysaa tixgelin la'aanta dakhliga waalidka. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Waalidiinta iyo qoysaska hela adeegyada ODDS, qareennada dadka hela adeegyada ODDS, Qareenada Taageera Dadka Naafada ah, Daryeeleyaasha Qoyska ee Mushaariga ah — Oregon, iyo Ururka Ootiisamka/Dhakaakaha ee Oregon |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay faallooyin badan oo ku saabsan kooxaha u-qalma maaliyadda ee jira ee ku jira Ka-dhaafitaanka Baahiyaha Aan Caadiga Ahayn ee Carruurta. Jawaab-celinta khuseysa dadka isku diiwaangeliyay ka-dhaafitaanka ee halista ugu jira inay heerka dhakhli dhaafaan oo lumiyaan helitaanka ka-dhaafitaanka. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Iyadoo lagu salaynayo faallooyinka aan helnay, waxaan 42 CFR §435.217 kooxaha u-qalma maaliyadda ku darnay codsiga dib loo eegay. Ku daristani waxay saamaxaysaa tixgelin la'aanta dakhliga waalidka. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Waalidiinta iyo qoysaska hela adeegyada ODDS iyo qareennada dadka hela adeegyada ODDS |

| |
|---|
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay faallooyin yar oo taageeraya ka saarista tixgelin la'aanta dakhliga waalidka. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Faalooyin badan oo kale ayaa codsaday in lagu daro tixgelin la'aanta dakhliga waalidka. Iyadoo lagu salaynayo arrimahaas, ayaan 42 CFR §435.217 kooxaha u-qalma maaliyadda ku darnay codsiga dib loo eegay. Ku daristani waxay saamaxaysaa tixgelin la'aanta dakhliga waalidka. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Waalidiinta iyo qoysaska hela adeegyada ODDS, qareennada dadka hela adeegyada ODDS, Qareenada Taageera Dadka Naafada ah, Daryeeleyaasha Qoyska ee Mushaariga ah — Oregon, iyo Ururka Ootiisamka/Dhakaakaha ee Oregon |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay dhowr faallooyin oo la nooga codsanayo inaan ka-dhaafitaanada 1915 (c) ee hadda la saxayo in lagu daro ikhtiyaarka waalidka mushaariga ah. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waxaynu la'nahay awood sharciyeed oo aan wax ugu darno isbeddelada la codsaday ee ka-dhaafitaanada 1915 (c) ee hadda jira, marka wax isbedel ah kuma samaynayn doono wakhti xaadirkan. Waxaan helnay tilmaamo ka yimid Sharci-dejinta ee ku jira Soo-jeedinta Xeerka Aqalka Sare ee 91 (SB 91) si loo sameeyo ka-dhaafitaan cusub si wax looga qabto baahiyaha carruurta qabta baahiyaha ugu daran. Ka-dhaafitaanka Baahiyaha Aan Caadiga Ahayn ee |

| |
|---|
| Carruurta ee cusub ayaa dhaqangelin doona amarrada SB 91's. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Waalidiinta iyo qoysaska hela adeegyada ODDS, qareennada dadka hela adeegyada ODDS, Qareenada Taageera Dadka Naafada ah, Daryeeleyaasha Qoyska ee Mushaariga ah — Oregon, iyo Ururka Ootiisamka/Dhakaakaha ee Oregon |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay dhowr faallooyin oo la nooga codsanaya ka-dhaafitaanka 1115 in la isticmaalo beddelka ka-dhaafitaanka 1915 (c). |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Qareenadu waxay nagu dhiirigeliyeen inaan si degdeg ah u wadno barnaamijkan. Naqshadda barnaamijka ee la soo-jeediyay isla sida ay hadda tahay ayay ahaan lahayd marka la isticmaalo ka-dhaafitaanka 1115 ama ka-dhaafitaanka 1915 (c). Waxaan dooranay ka-dhaafitaanka 1915 (c) maadaama uu yahay ikhtiyaarka ugu degdegsiimo badan ee la heli karo. Codsiga ka-dhaafitaanka 1115 ayay u badan tahay inuu qaadan lahaa waqti dheer si loo diyaariyo oo loo ansixiyo. Gobolku wuxuu horay u ansixiyay ka-dhaafitaanada 1915 (c) kuwaasoo noqday khariiddada lagu dedejiyo codsiga ka-dhaafitaanka cusub, diyaarinta iyo soo gudbinta. Ka-dhaafitaanada 1915 (c) ayaa sidoo kale leh culeys ka yar kuwa shuruudaha maamulka iyo ka warbixinta u baahan marka lala barbardhigo ka-dhaafitaanka 1115. Tusaale ahaan, ka-dhaafitaanada 1115 ayaa u baahan xog uruurin ballaaran iyo qorshooyin qiimeyn si loo qiyaaso wax-ku-oolnimada mashaariicda la soo-jeediyay. Waxay sameeyaan wicitaanada horusocodka ee billaha ah, warbixinta horusocodka ee saddex biloodlaha ah iyo sannadlaha ah, iyo shuruudo kale oo culus. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
| --- |
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Waalidiinta iyo qoysaska hela adeegyada ODDS, qareennada dadka hela adeegyada ODDS, Qareenada Taageera Dadka Naafada ah, Daryeeleyaasha Qoyska ee Mushaariga ah — Oregon, iyo Ururka Ootiisamka/Dhakaakaha ee Oregon |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay faallooyin badan oo codsanaya inaan kordhino xaddidaadda saacadaha-halkii cunug laga bilaabo 20 saacadood ilaa 40 saacadood toddobaadkii, ilmo kasta. |
| **Jawaab-celinta ODDS**: Kooxaha shaqo ee aanu la tashanay intii aanu qoraynay ka-dhaafitaanka waxay doorbidayeen 20 saacadood toddobaadkii marka lala barbardhigo 40 saacadood, maadaama 20 saacadood ay labanlaabi karto tirada carruurta uu barnaamijku ugu adeegi karo miisaaniyadda SB 91's. Taas awgeed, xaddidaadda 20-ka saacadood ah toddobaadkii ayaa sidiisa u jiraya. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
| --- |
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Waalidiinta iyo qoysaska hela adeegyada ODDS, qareennada dadka hela adeegyada ODDS, Qareenada Taageera Dadka Naafada ah, Daryeeleyaasha Qoyska ee Mushaariga ah — Oregon, iyo Ururka Ootiisamka/Dhakaakaha ee Oregon |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay codsiyo badan oo khuseeya kordhinta tirada aan la laba jibaarin ee kaqaybgelayaasha si loogu adeego carruurta oo dhan ee buuxisa shuruudaha u-qalmitaanka. |

**Jawaab-celinta ODDS:**

Ma samayn doono wax isbeddelo ah wakhti xaadirkan. Miisaaniyadda ay SB 91's u ansixiyeen si sharci ah ayaa oggolaanaya tirada ugu badan, aan la laba jibaarin ee 171 boos sannadkii ka-dhaafitaan kasta oo loogu talagalay daryeelka waalidka mushaariga ah ee 20 saacadood toddobaadkii ah. Kadib marka barnaamijka la diyaariyo, waxaan la socon doonaa kharashaadka iyadoo aan xog ku salaynayno waxaa laga yaabaa inaan saxno tirada shaqsiyaadka loo adeegi karo ee ku qoran ka-dhaafitaanka.

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Waalidiinta iyo qoysaska hela adeegyada ODDS iyo qareennada dadka hela adeegyada ODDS |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay faallooyin dhowr ah oo la nooga codsanayo ka-dhaafitaanada si loo kala horumariyo dadka aan hadda helin daryeelka adeegaha. |
| **Jawaab-celinta ODDS:** Waan buuxin karnay shardigan balse iyadoo lagu salaynayo jawaab-celinada kale ee la helay, shuruuddan ayaan ka saarnay codsiga ka-dhaafitaanka. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Qoyska helaya adeegyada ODDS |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay hal codsi oo aan marka hore mudnaanta koowaad ku siinayno qoysaska Dhaladka ah iyo kuwa Madowga ah, kuwaasoo la kulma takoor iyo caqabado joogto ah kadibna waxaan mudnaanta siin doonaa qoysaska dakhligoodu hooseeyo, kuwa hoy-laaweyaasha ah iyo qoysaska waalidka keligiis nool ah. |

| |
|---|
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waqtigan la joogo iyadoo lagu salaynayo jawaab-celinta guud kuma samayn doono codsiga ka-dhaafitaanka wax isbeddelo ah oo khuseeya codsigan. Soo-jeedinta Aqalka Sare ee 91 ayaa qeexaysa shuruudaha u-qalmitaanka, noocyada bixiyeyaasha ee la oggolyahay, shuruudaha tababarka, miisaaniyadda, iyo isla xisaabtanka iyo shuruudaha. Soo-jeedinta aqalka sare ayaa sidoo kale oo nooga baahan in aan hubino aan si joogto ah oo xaqsoor leh uga fulino barnaamijka gobolka oo dhan. |

| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Qoysaska helaya adeegyada ODDS |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay laba codsi oo ku saabsan in waalidiinta aan looga baahnayn inay maraan baaritaanka taariikhda fal-dambiyeed. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Soo-jeedinta Aqalka Sare ee 91 ayaa uga baahan waalidiinta inay noqdaan xirfadleyaasha taageerada tooska ah (DSPs) oo ay shaqaaleysiiyaan hay'adaha daryeelka bixiya. Sharcigu wuxuu uga baahan yahay DSPs-yada inay maraan baaritaanka taariikhda fal-dambiyeed. Soo-jeedinta aqalka sare ma bixin wax ka-dhaafitaan ah oo loogu talagalay shuruuddan. ODDS wax isbeddelo ah kuma samayn doonto codsiga ka-dhaafitaanka wakhti xaadirkan. |

| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Waalidiinta iyo qoysaska hela adeegyada ODDS, qareennada dadka hela adeegyada ODDS, Qareenada Taageera Dadka |

| |
|---|
| Naafada ah, Daryeeleyaasha Qoyska ee Mushaariga ah- Oregon, iyo Ururka Ootiisamka/Dhakaakaha ee Oregon |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay codsiyo badan oo inaan meesha ka saarno dokumeentiyada ku filnaansho la'aanta daryeeleyaasha ee ku jira shuruudaha ka-dhaafitaanka. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waxaanu shuruuddan ugu talagalnay in aynu mudnaan siino shakhsiyaadka iyo qoysaska muujiya ku filnaansho la'aanta daryeeleyaasha la heli karo. Ugama aynu talagelin inaan kordhino culayska hawleed ee saaran qoysaska. Iyadoo lagu salaynayo faallooyinka la helay, shuruuddan ayaan ka saarnay codsiga ka-dhaafitaanka. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Waalidiinta iyo qoysaska hela adeegyada ODDS, qareennada dadka hela adeegyada ODDS, Qareenada Taageera Dadka Naafada ah, Daryeeleyaasha Qoyska ee Mushaariga ah- Oregon, iyo Ururka Ootiisamka/Dhakaakaha ee Oregon |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay codsiyo badan oo khuseeya "bakhtiyaa nasiib fudud oo lagu saleeyo baahida." Falanqeeyayaashu waxay sheegeen inay jireen caqabado aad u badan inay horay u jireen oo ku hor gudban helitaanka barnaamijkan. Faalo bixiyeyaashu waxay sidoo kale qoreen in shuruudaha dheeraadka ah ay yihiin kuwo maadi ah oo abuuraya fursado eex. |

| **Jawaab-celinta ODDS:** |
| --- |
| Iyadoo lagu salaynayo jawaab-celinta la helay, ma beddeli doono ka-dhaafitaanka. Habka xulashadu waa sidii hore ayuu ahaan doonaa. Waxaan codsadeyaasha bilowga ah ugu meelayn doonaa ka-dhaafitaanka lambar aan kala sooc lahayn oo u dhaxeeya hal iyo wadarta tirada codsade ee bilowga ah. Dadka hela lambarrada koowaad ee awoodda ka-dhaafitaanka waa inay buuxiyaan shuruudaha u-qalmitaanka oo dhan. Dadka u-qalma, waxay awoodi doonaan inay isdiiwaangeliyaan. Codsadeyaasha bilowga ah ee hela lambarada ka baxsan awoodda barnaamijka waxaan gelin doonaa liiska sugitaanka ee loogu talagalay gobolka oo dhan. Liiska sugitaanka ayaa raaci doona lambarrada codsadaha hadba sida ay u kala horeeyaan. Codsadeyaasha soo codsada kadib qori-tuurka bilowga ah kadib waxay u heli doonaan lambarada markuu dhammaado liiska sugitaanka qaabka sida loo kala horeeyo, mayaa adeegga loo kala hor heli doonaa. Marka boosaska ka-dhaafitaanka ay furmaan, waxaanu ku wargelin doonaa codsadaha ugu sarreeya liiska sugitaanka inuu maro qiimeynta u-qalmitaanka. |

| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
| --- |
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Ururka Caalamiga Shaqaalaha Adeegga ee Maxalliga ah (SEIU) 503 |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay hal faallo oo la nooga codsanaya in ka-dhaafitaanku oggolaado shaqaalaha taageerada gaarka ah iyo hay’adaha dooqa bixiyaha leh ee u-qalma bixinta adeegga. |

| **Jawaab-celinta ODDS:** |
|---|
| Soo-jeedinta Aqalka Sare ee 91 ayaa qeexaysa nooca bixiyaha waalidka ah ee takhasuska leh kaasoo ay tahay inay shaqaalaysiiso hay'adda oo aan ahayn ilmaha ama dadka kale<br>waalidka ilmaha. Bixiyaha daryeelka ee waalidka ah waxaa laga yaabaa inay wax lacag ah ku siin hay'ad uu waalidku leeyhay bixinta adeega daryeelka ilmaha macmiilka ah, ilmaha ama xubin kasta oo qoyska ka mid ah ama waalidka ama xubnaha kale ee qoyska ee ka haya hay'adda jago maamul ama hogaamineed, oo ay ku jiraan ka mid ahaanshaha guddiga maamulka hay'adda iyo wakaaladda shaqaaleysiisa bixiyaha daryeelka waalidka si loo bixiyo adeegaha daryeelka ee loogu talagalay ilmaha macmiilka ah uma shaqaalaysiin karto bixiyaha waalidka ah qandaraasle madax-banaan ahaan. Haddii ay jiraan isbeddelo lagu sameeyay Soo-jeedinta Aqalka Sare ee 91, waxaanu u dhaqan gelin doonaa sida ku cad soo-jeedinta. Haddii mustaqbalka la sameeyo hay'ad leh doorashada bixiyaha daryeelka, waxaanu go'aamin doonaa inay shaqaalaha u shaqeeya hay'adahani ay buuxin karaan shuruudaha SB 91 iyo in kale. Wax isbeddel ah kuma samayn doono codsiga ka-dhaafitaanka wakhti xaadirkan. |

| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay** |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Waalidiinta iyo qoysaska hela adeegyada ODDS, iyo qareennada dadka hela adeegyada ODDS |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay faallooyin badan oo lagu muujinayo mahadnaqa loo hayo hawsha aan ka hayno ka-dhaafitaankan. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waanu ka mahadcelinaynaa mahadnaqaaga waxaana rajaynaynaa inaan uga wadashaqayno si joogto ah Soo-jeedinta Aqalka Sare ee 91 iyo Ka-dhaafitaanka |

| |
|---|
| Baahiyaha Aan Caadiga Ahayn ee Carruurta. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Maxim Healthcare Services |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay hal faallo oo lagu muujinayo walaac laga qabo in shaqaalaha kalkaalinta ee gaarka ah uu si xun u saamayn doono ka-dhaafitaankan. |
| **Jawaab-celinta ODDS:** Adeegyada Shaqaalaha Kalkaalinta ee Gaarka ah waa adeeg gara u ah Qorshaha Gobolka Oregon ee Medicaid oo loogu talagalay dad gaar ah oo lehna shuruudo gaar ah. Ka-dhaafitaanka Baahiyaha Aan Caadiga ahayn ee Carruurta si taban uma saamayn doono u-qalmitaanka adeegyada shaqaalaha kalkaalinta ee gaarka ah. Wax isbeddel ah kuma samayn doono codsiga ka-dhaafitaanka wakhti xaadirkan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Qoyska helaya adeegyada ODDS |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay hal codsi oo ka-dhaafitaan oo lagu rabo in la qoondeeyo boosaska loogu talagalay carruurta hesha adeegyada kalkaalinta. |

| |
|---|
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Shuruudaha dheeraadka ah ee carruurta lagu meeleeyo kooxda adeegga ee ugu saraysa iyadoo ugu wacan tahay baahiyaha taageerada caafimaadka ama habdhaqanka oo aadka u sarreeya oo ay ka mid yihiin dadka hela adeegyada kalkaalinta. Waxaa horay u jiray boosas ka banaan barnaamijka la soo-jeediyay ee loogu talagalay carruurtan haddii ay buuxin karaan dhammaan shuruudaha u-qalmitaanka barnaamijkan oo dhan. |

| Macluumaadka kooban ee faallooyinka la helay |
|---|
| **Kooxda Dhagaystayaasha:** Qoyska helaya adeegyada ODDS |
| **Macluumaadka kooban ee faallooyinka:** Waxaan helnay hal faallo oo soo-jeedinaysa qaabka isticmaal oo kale oo la tixgelin karo oo loogu oggolaanayo waalidiinta inay bixiyaan taageero dhan ilaa dheelitirka isticmaalka celceliska ah ee aan la adeegsan. |
| **Jawaab-celinta ODDS:**<br>Waqti xaadirka ah, wax isbeddel ah kuma samaynayno codsiga ka-dhaafitaanka si aan u qaadano qaabab kale oo isticmaal. |

Waxaad heli kartaa dokumeentigan oo ku qoran luuqado kale, daabacaad ballaaran, farta indhoolayaasha ama u qoran qaab aad doorbidayso, kala xiriir ODDS lambarka 503-945-5811. Waxaanu aqbalnaa wicitaanada dhammaan noocyada adeegga gudbinta ee loogu talagalay dadka Dhegoolaha ah, kuwa Dhagaha Culus, kuwa Dhegaha-Indhaha la', kuwa aragga la’ ama araggoodu hooseeyo. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegga gudbinta booqo https://www.oregonrelay.com ama https://www.fcc.gov/general/internet-based-trs-providers.